

Foomka oggolaanshaha bixinta xogta shakhsiyeed ee loo gudbinayo adeeg-bixiyeyaasha caafimaadka ee degmada



1. Ujeedo

Markaan saxiixo foomkan, waxaan oggolaanayaa in xarunta qaxootiga (kaamka) aan deggenahay ay u gudbin karto xogtayda shakhsiyeed ee ku qoran qodobka 2aad degmada

,si xarunta qaxootigu (iiga caawiso in la ii qabto ballan (waqti) aan kula kulmo adeeg-bixiyeyaasha caafimaadka.



2. Xogta shakhsiyeed ee loo gudbinayo degmada

Waxaan oggolahay in xogtan shakhsiyeed ee soo socota lala wadaago degmada martida loo yahay (vertskommune):

- Magac
- Jinsiga
- Lambarka D-
- Lambarka teleefanka
- Cinwaanka iimaylka

Waxaan ogahay inaan aniga laftaydu sidoo kale la xiriiri karo degmada si aan u helo daryeel caafimaad. Waxaan ogahay in ay ii tahay ikhtiyaari (doorashadayda) in aan oggolaado in xarunta qaxootigu u gudbiso xogtayda degmada, isla markaana aan sidoo kale xaq u leeyahay in aan helo daryeel caafimaad xitaa haddii aanan oggolaanin bixinta xogtayda shakhsiyeed.



3. Ku saabsan oggolaanshaha

Oggolaanshuhu waa ikhtiyaari (doorashadayda), wuxuuna shaqaynayaa inta aan ku noolahay xarunta qaxootiga (kaamka). Waxaan ka laaban karaa oggolaanshahan wakhti kasta anigoo la xiriiraya xarunta qaxootiga.

Markaan ka guuro xarunta qaxootiga, oggolaanshuhu ma sii shaqaynayo (dhacayaa), foomkana iyo dhammaan xogaha shakhsiga ahna waxa tirtiraysa xarunta qaxootigu isla markiiba.



4. Xuquuqda

Waxaan xaq u leeyahay inaan arko (la i tuso), in aan saxo ama la tirtiro xogtayda shakhsiyeed ee ku qoran foomka ogolaanshaha, anigoo la xiriiraya xarunta qaxootiga.

Degmada waxa saaran waajibaad kayd in sida uu dhigayo sharciga kaydintu (arkivloven). Taas macnaheedu waa in xogta shakhsiyeed ee degmada loo gudbiyo loo arki karo mid mudan in la kaydiyo (arkivverdig), sidaas darteedna waa in la hayaa (la kaydiyaa), mana la tirtiri karo xitaa haddii aad mustaqbalka ka laabato oggolaanshahaaga.



5. Xaqiijinta oggolaanshaha

Waxaan halkan ku xaqiijinayaa in aan fahmay shuruudaha oggolaanshaha, waxaana bixinayaa oggolaansho in xarunta qaxoontigu ay u gudbiso xogtayda shakhsiga ah degmada sida kor ku xusan.

Goobta

Taariikh

Saxiix